# SHEEKADA

**Qaybta I**

**Rome, Juun 17, 1800**
**Kaniisada Sant'Andrea della Valle**

Cesare Angelotti, maxbuus siyaasi ah oo ka baxsaday xabsiga, ayaa soo galaya kaniisadda wuxuuna isku qarinayaa qolka gaarka ah ee qoyska ee kaniisada ku dhex yaalla. Aartiiste la yiraahdo Mario Cavaradossi ayaa soo galaya si uu uga shaqeeyo sawirka Mary Magdalene, oo ay ku dhiirigelisay haweeney uu arkay inay ku tukanaysay
kaniisada maalin kahor—Angelotti walaashiis, Marchesa Attavanti. Iyadoo Sacristan oo gaboobay uu gudanayo waajibaadkiisa nadiifinta kaniisada, Cavaradossi wuxuu isbarbar dhigayaa timaha dahabiga ah ee Magdalene ee uu sawirayo iyo quruxda timaha madow ee haweeneyda uu jecel yahay, fannaanada Floria Tosca.

Kadib markuu Sacristan tago, Angelotti wuxuu ka soo baxayaa meeshii uu ku dhuumanayay wuxuuna caawimaad ka raadsanayaa Cavaradossi. Waxaa kala qariyay soo gelitaanka Tosca, oo u timid inay argto jacaylkeeda. Cavaradossi wuxuu Tosca ka qariyay in Angelotti joogo
iyadoo uu ka baqayo in Tosca oo cibaadada leh ay ku wargeliso qirashadeeda Katooliga ah wax ku saabsan baxsashadii Angelotti. Cavaradossi wuxuu sidoo kale isku dayayaa inuu dejiyo masayrka Tosca ee Magdalene ee uu sawiray. Markay
tageyso labada nin ayaa bilaabaya qorshe, kaliya in la maqlo filan waa ah—baaq muujinaysa in baxsashadii Angelotti ay ahayd mid la ogaaday. Waxay u cararayaan Qasriga Cavaradossi si ay uga dhuuntaan Angelotti.

Gacanyaraha kaniisada iyo kaaliyaasha kaniisada ayaa soo galay, iyagoo ku faraxsan wararkii ugu dambeeyay ee guushooda iyo guuldarrada Napoleon. Baron Scarpia, oo ah madaxa booliska, ayaa soo galay, isagoo uga daba yimi Angelotti kaniisada. Tosca ayaa soo noqotay oo ogaatay in jacaylkeedii tagay. Scarpia ayaa Tosca ku beertay masayr, isagoo soo jeedinaya in jacaylkiisa ay xiriir la leeyahay Marchesa. Tosca ayaa halhaleel ku baxeysa si ay u hesho aartiiste kahor jilliinkeeda aadka loo sugayo fiidkaas. Scarpia wuxuu dirayaa shaqaalihiisa si ay u raacaan iyada, isagoo rajeynaya in Tosca ay u kaxeyn doonto Cavaradossi iyo Angelotti. Waxa uu filayaa in uu ciqaabo canaasisrta oo uu kaligiis Tosca ku raaxaysto. Dad badan oo faraxsan ayaa buux dhaafiyay kaniisada si ay ugu dabaaldegaan guuldarada Napoleon.

**BAREEG**

**Qaybta II**

**Qasriga Farnese, xarunta Scarpia**

Goobta cashada, Scarpia wuxuu sugayaa Tosca. Markay ciidankiisu keenaan Cavaradossi, Scarpia ayaa ka wareysan doona aartiistaha meeshuu Angelotti ku maqanyahay. Waxba ma sheegayo oo wuxuu u dirayaa qolka jirdilka ee dhanka ku haya xafiiskiisa. Tosca ayaa timi kadib bandhigeedii fiidka, Scarpia ayaana ku khasbay inay dhageysato jirdilka Cavaradossi. Way u adkaysan kari weyday waxayna u sheegtay Scarpia halka Angelotti uu ku dhuumanayo. Ciidanka Scarpia ayaa goobta halhaleel u aaday si ay usoo qabtaan Angelotti. Farriin baa la keenay, saxaysa warkii hore: Napoleon waa guulaystay, kuma uusay guuldarraysan Marengo. Cavaradossi, jirdil daashaday, ayaa afka furtay
isagoo farxad darteed la ooyaya guusha uu gaaray, islamarkaana ammaanaya Jamhuuriyadda iyo dadkeeda geesiyaasha ah Erayadiisa waa khiyaano qaran, Scarpia ayaana xabsiga u jiiday.

Tosca waxaa u furan oo kaliya inay la gorgortanto Scarpia si loo badbaadiyo jacaylkeeda. Scarpia ayaa ku talinaya inuu ku badashto nafta Cavaradossi
wakhti yar oo uu la raaxaysto Tosca. Tosca ayaa la dagaalaysa oo Alle weydiisanaysa inuu caawiyo. Balse, ugu dambeyntii, waxay ogalaanaysaa shuruudaha Scarpia iyadoo lagu beddelayo dil jeesjees ah
iyo ruqsad badbaado oo loogu talagalay iyada iyo Cavaradossi. Markuu qorayo ruqsadda, Tosca indheheedu waxay qabteen mindida cashada, waxayna heshay xal kale oo ay ku xalliso dhibkeeda.

**JOOJIN**

**Qaybta III**

**Barta u sarraysa ee Castel Sant'Angelo**

Kahor waaberiga Cavaradossi wuxuu xusuusanayaa habeen farxadeed oo beertiisa kula qaato Tosca. Tosca ayaa timi xabsiga iyadoo wadata warqadda ruqsada waxayna u sheegtay Cavaradossi sida ay ula macaamishay Scarpia. Waxay u sheegaysaa inay tahay inay maraan khiyaanada dil been abuur ah, waxayna ku hagaysaa Cavaradossi sida loo kufo oo la iska yeel-yeelo
in la dhintay. Balse marka ay askartu u yimaadaan kooxda toogashada, Scarpia ayaa leh qosolka ugu dambeeya. Iyadoo aanay jirin xulashooyin kale, Tosca gacanteeda u isticmaali doonta, iyadoo ku kacaysa falka ugu wayn ee ay ku diidayso jacayl.

**Qoraal Hoosaad Dhaxal gal ah**

Sannadihii ka dambeeyay Kacaankii Faransiiska, Jamhuuriyadda Faransiiska ee xorta iyo cilmaaniga ah waxay la dagaallantay boqortooyooyinkii Katooliga ee muxaafidka ahaa iyo boqortooyadii, sida Hapsburg Austria (oo gacanta ku haysay wixii markii dambe noqon lahaa woqooyiga Talyaaniga) iyo Boqortooyada Naples (oo xukuntay koonfurta Talyaaniga, oo ay ku jirto Papal States). Aragtida xorta ah ee Cavaradossi ayaa horseeday rikoorka bilayska waxayna ka dhigtay qof mas'uuliyiinta Rome ay ku danaynayaan, xaruntii hore ee papacy.